# XEER NIDAAMIYAHA XABSIYADA DALKA SOOMAALIYEED

AVV. DR. ABDIKADIR MOHAMED MUSE

# XEER NIDAAMIYAHA XABSIYADA DALKA

- Xeer nidaamiyaha Xabsiyada Dalka waxaa loo yaqaanaa Xeer Lr.49 ee 9-Agos.1984 wuxuuna leeyhaay Erayo soonoq noqonaayo oo u baahan in la fahmo micnahooda waxa loola jeedo:-

1. Taliyaha waxaa loola Jeedaa Taliyaha Ciidanka Asluubta.
2. Taliyaha Xabsiga waxaa loola jeedaa Sarkaalka Mas'uulka ka ah Xabsiga
3. Sarkaalka Caafimaadka waxaa loola jeedaa Qofka haya Jegada Maamulka Caafimaadka meesha uu ku yaalo Xabsiga.
4. Amarada Joogtada ah waxaa loola jeedaa amarada uu soosaro Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

# HABKA LOOGU DHAQMO XEER NIDAAMIYAAH IYO AMARADA JOOGTADA AH

- Waxaa saldhig u ahaanaya Mabaa'diida hoos ku qoran ayadoo markastaba la tixgalinaayo dhaqanka kala duwan ee kooxaha maxabiista ah, sida Xeerka uu dhigayo.

b. In habsamida iyo Nidaamka Guud ee laxiriira dhaqanka iyo dhaqaalaha Maxaabiista loo dhowro si sharci ah oo aan marnaba dhaafsiisnayn sugidda daryeelka xasiloonida nabad-galyada oo aysan waxba u dhimaynin haynta maxaabiista.

c. Haynta Maxaabiista waxaa saldhig u ah dib u abuuridda nolol ku dhisan shaqo laguna barbaariyo qaab bulshonimo .

j. Maamulka maxaabiista waa inuu ahaadaa mid dhiiri galinaayo isku kalsoonidda qofka, xilkasnimadiisa kuna abuuraysa kor u qaadida hamigiisa, lana siiyo aragtiyo waxtar u leh noloshiisa.

x. Anshaxa wanaagsan ee xubnaha Ciidanka Asluubta waxay hormuud u tahay toosinta Maxbuuska iyo nolosha dambe ee Maxbuuska.

# MAGACAABIDDA XABSIYADDA

- Markii loo baahdo in meel lagu magacaabo Xabsi ama Xarun Asluubeed Taliyaha Ciidanka Asluubta ayaa Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arimaha Diinta talo ka siinaayo kaasoo isaguna kusoo saari doono Decretto Ama Xeer, kuna dhawaaqayo Aas'aaska Xabsiga Ama hadii ay Xarun tahay.

# HAYNTA MAXAABIISTA XUKUMAN

- Taliyaha Ciidanka Asluubta oo amar ka bixiya mooyaane oo ah dhinaca nabad-galyada Maxaabiista xukumane oo ay ku jiraan lahaayayaasha lagu soo xiro xeerarka Gaarka ah, hayntooduna ay soo xalaaleyeen Hay'adihii Sharci ahaan Awoodda u lahaa, mudooyinka Xukunkooda waxay ku dhamaysanayaan sida soo socota:-

a. Xabsiga degmada lagu xukumay hadii mudada xariga ka hadhay aaney ka badnayn hal sano markii xukunka ugu dambeeyay lagu dhawaaqay.

b. Xabsiga Gobolka hadii mudada xariga ka hadhay aaney ka badnayn laba sano, markii xukunka ugu dambeeyay lagu dhawaaqay.

c. Xabsiyada dhexe ama kuwo gaarka ah Maxaabiista dilka sugaysa ama kuwa xarigoodu ka badan yahay labo sano marka xukunka ugu dambeeya lagu dhawaaqay iyo kusoo noqyaasha iyo dambi caadaystayaasha xarigoodu ka badan yahay hal sano.

d. Qoralada ku xusan xuruufaha sare waxaa ka reeban Maxaabiista Caruurta ah, Haweenka iyo Maxaabiista lala soo xiro Ciidmada Qalabka sida, kuwaasi oo hayntoodu ay noqonayso:

# HAYNTA MAXAABIISTA XUKUMAN

1. Maxaabiista Caruurta ah waa in lagu haayaa meel gaar ah oo ka baxsab Maxaabiista waa weyn inta loo badalaayo Xabsiga Caruurta ah, sida ku cad Xeer Lr.13. soona baxay Bishii March 1970. ama meeshii kale ee loo qoondeeyay.
2. Ayadoo la txigalinaayo Caafimaadka iyo Xanaanada u gaarka ah Haweenka qofkii xarigiisa uu ka badan yahay lix bilood waxaa lagu haynayaa oo kali ah Xabsiga Gobolka ama Xabsiyada Dhexe Qaybta Haweenka.
3. Maxaabiista laga soo xiro Ciidamada Qalabka sida waxaa lagu haynayaa Xabsiyada Dhexe iyo kuwa Gaarka ah, oo ka gooni ah Maxaabiista kale, waxaana la gaynayaa meeshii suurta gal ah inta loo badalaayo Xabsi loo qoondeeyay.
4. Hadii ay dhaco in Xabsiga loo soo gudbiyo Haween sidata canug yar Maxkamadduna u aqoonsato in Canugaasi ay ku haysato Xabsiga Gudihiisa Ama Haweeneey Uur laheed ay ilmo ku dhasho Xabsiga ilmahaasu wuxuu hooyadiis kula noolaan karaa Xabsiga Gudihiisa Muddo aan ka badneyn Laba sano, mudadaasi labada sanadood kahor Taliyaha Xabsigu waa in uu diyaariyaa sidii ilmahaasi loogu wareejin lahaa eheladiisa, hadii ay cadaato in ilmahaasi aysan ehel lahayn waxaa lagu wareejinayaa Xarumaha Lagu xanaaneeyo dhalinta (Kacaanka).

# HAYNTA MAXAABIISTA AAN XUKUNEYN

- Hadii taliyuhu daryeelka nabad galiyada awgeed talo ka dhiibto mooyaane maaxaabiista aan xukumaneyn ama lahaayayaasha oo amarkii hayntoodi ay ku bixiyeen Hay'adihii sharci ahan awooda u lahaa Xeerarka Gaarka ah, walise sugaaya Xalaaleyntii Hayntooda, waxaa lagu haynayaa Xabsiyada hoos ku qoran:-
- Lahaaye-yaasha waxaa lgu haynayaa Xabsiyada ku qoran Jideeyaha Xariga hase yeeshee daryeelka nabad-galyada awgeyd ama ciriiri dartii waxaa loogu badali karaa Amarka Taliyaha Xabsi kale oo munaasab u ah markaasi oo kale waa in la ogeysiiyaa Hay'addi soo xirtay.

# FURIDDA IYO XIRIDDA XABSIYADA

1. Xabsiga waa in maalin kasta la furaa lixda subaxnimo haddii aaney jirin sabab gaar ah oo keeni karta dib u dhigidda furidda, sida nabad-galyada, caafimaadka, iyo hawada oo xumaata.
2. Xabsiga waa in maalin kasta la xiraa shanta galabnimo lana hubiyaa sugnaashaha Maxbuus kasta oo ku xiran xabsiga inuu ku jiro qolkiisa.
3. Xiliga la kala wareegaayo Xabsiga Furiddiisa iyo xiriddiisa waa inuu goob-joog ka ahaado Sarkaalka howsha leh ama heeganka leh ama ku xigeenkiisa.

# HURDADA

1. Maxaabiistu waxay seexanayaan qolal waaweyn iyo edegyo (cells) hadba sida dhismaha xabsigu yahay ama ay la noqoto taliyaha xabsiga.
2. Maxaabiista labka ah iyo kuwa dhediga ah waa in si gooni ah loo kala haayaa waana in lagu kala xareeyaa guryo kala gaar ah, furayaasha iyo qufulada ee xabsiga haweenka waa in ay gacanta ku hayaan xubin haween ah, waxaan ka reeban xubin lab ah inuu galo Xabsiga Qaybta haweenka iyadoo aaney la soconin dhedig.
3. Maxaabiista Caruurta ah oo dadoodu ay ka yartahay 18 sano waa in lagu haayaa meel ka gaar ah Maxaabista kele ee waaweyn, hadii ay meeshaasi ku oolin xabsi u gaar ah caruurta inta la badalaayo sida uu dhigaayo Xeer Lr.13 soona baxay Bisha March 1970, Maxaabiista Dhalinyarada ee da'doodu u dhexeyso 14 sano ilaa 18 sano waa in laga soocaa Maxaabiista waaweyn loona hooyaa meeshii ay hadba suurta gal tahay

# HURDADA

## EDEG TAKOORKA

Xabsi kasta waa in uu yeeshaa meeshii suurta gal ah Edegyo Takoor oo loogu tala galay Maxaabiista Asluubta xumi la timaado, Edeg kasta oo kamid ah Edegyadaasi waa inuu caddeeyaa Sarkaalka Cafimaadka ee Xabsiga inuu u qalmo isticmaalka loogu tala gaaly.

## NADAAFADDA XABSIGA

1. waa in ay dhowrnaataa Guud ahaan iyo gaar ahaan Guryaha Jiifka Musqulaha Edegyada iyo Jikooyinka, waxayna Mas'uuliyadaasi saarantahay Maxbuus kasta, waxaana kuwaajib ah inuu daryeelo gogoshiisa, dharkiisa, weelkiisa, kutubkiisa, iyo alaabta kale ee uu gaar ahaan u isticmaalo.
2. Guryaha iyo Edegyada waa in loo furaa jirdaha iyo daaqadaha maalinta inteeda hore, si ay u qoraxaystaan dabeeshana u marto.
3. Si loo dhowro Nadafadda Guud ee Xabsiga Guryaha Jiifka Maxbiista waa inay lahaadaan Musqulo Gaar ah.

# BAARISTA MAXAABIISTA

1. Waa inay u dhacdaa Habka ugu hufan si looga helo wax alaale wixii mamnuuc ah ee uu qarsanaayo Maxbuuska.
2. Waa in aanan Maxbuuska lagu qaawinin Maxbuus kale hortiis lana baarin, baaris dhaafsiisan dul kataabad (rub down).
3. Soo galitaanka ugu horeeya ee Maxbuuska uu soo galo xabsiga wixii lagaga helo baarista ee mamnuuca ah waa laga reebayaa waana loo meelaynayaa.
4. Wax alaale wixii Maxbuus lagaga helo baaris ama si kale inta uu xabsiga ku jiro isagoo xukuman ama lahaye ama Garsuge waa lagala wareegayaa waxa ayna kamid noqonayaan hantida Xabsiga sida uu dhigaayo Qod.65aad ee Xeerkaan.

# HANTIDA MAXBUUSKA

1. Soogalitaanka Maxbuuska Cusub hadii laga helo alaab aan dhigaalmeynin waa in lagu amraa inuu uga talo baxo sida ugu deg dega badan ee suurta galk ah.
2. Soogalitaanka Maxbuuska wax alaale wixii alaab ah ee keeni kara cudur faafin ee laga helo waa in si deg deg ah loo baa'biyaa iyadoo wax magdhaw ah oo lasiinaayo Maxbuuskaasi aaney jirin sida ku cad Qod.20aad Qeybtiisa 2aad ee Xeerkani.
3. lix bilood kadib siideyntiisa ama dhimashadiisa oo lafaafiyay Maxbuuska dadkiisa ama wakiilkiisa ay soo doonan waayeen Alaabta Xabsiga u taalay sida uu dhigayo Qod.2aad, wuxuu taliayha ku wargalinayaa in lagu wareejiyay Xabsiga.
4. Lix bilood kadib dhaqan galka xeer nidaamiyahaani wax alaale wixii alaab ah ee Xabsiga lagu haayo oo aanan cidna soo sheeganin waa la baabi'nayaa haddii lagado wixii kasoo baxa waxaa lagu wareejinaya Hantida Xabsiga.

# WARKA IYO ASHTAGADA MAXAABIISTA

- Taliyaha Xabsiga waa inuu hubiyaa ama amraa in la xaqiijiyo Magaca, da'da, dhirirka, calaamadaha u gaarka ah Maxbuuska, iyo wax alaale wixii kale ee la xiriira maxbuuska soo galitaankiisa loona qoro qaabkii loogu talagalay.
- Maxbuus kasta soo galitaankiisa waa in loo sheegaa wax alaale wixii ku saabsan Xeerka lagu dhaqo Maxaabiista kooxdiisa ah, Waxaana loogu latala galay inuu ku garto xuquuqdiisa waajibaadkiisa iyo sidii naftiisa u qabadsiin lahaa nolosha Xabsiga.
- Maxbuus kasta oo xukuman Xarigiisuna kabadan yahay 6bilood waa in sawir laga qaadaa laguna dhajiyaa nuqulka sawirkaasi galkiisa lana kaydiyaa, nuqul sawirkaasi kamid ahna lama siin karo qof  ama hay'ad aan sharcigu awood u siinin.

# CUNTADA MAXAABIISTA

- Cuntada maxaabiista ee ku xusan Qod.27 ee Xeerkaan waxay ahaaneysaa sida ku faahfaahsan lifaaqa b, ee Xeer nidaamiyaha kaasoo nuqulkiisa lagu dhajinaayo meel kamid ah Xabsiga oo laga akhrin karo.
- Maxbuus kasta waa in uu helaa biyo cabitaan ku haboon ee uu cabo.
- Cuntada ku tilmaaman xubinta koowaad qodobkaan ee ay ku jirto Cuno Ciqaabeed wax ka badali karo Taliyaha Xabsiga isagoo raacaya talada Sarkaalka Caafimaadka ee Xabsiga oo u cuskanaayo Daryeelka Caafimaadka Maxbuuska.

# HUGA MAXAABIISKA

1. Hogga Xabsiga ugu yaraan waa in Todobadkiiba mar la dhaqaa la iskuna badalaa, waa in aanu ahanin mid qofnimada Maxbuuska waxyeeleen kara ama hoos u dhigi kara qofnimadiisa.
2. Markii maxbuuska lagaynaayo Maxkamad warqad shaqo ama meel gaar ah oo aan loo baahneyn in la ogaado Maxbuusnimadiisa waxaa loo ogolaanayaa hugiisa ama hug kale ee aan muujineyn inuu Maxbuus yahay.
3. Gogosha Maxaabiista waa in la qorexeeyaa sida hadba uu amar ku dhiibo taliyaha Xabsiga.
4. Qubeyska Maxaabiista markii ay suurta gal tahay waa in Maxbuus kasta lasiiyaa fursad uu maalin kasta ku qubeysta si kastaba ahaatee waa in Maxaabiista korkoodu nadiifiyaan lana siiyo sida hadba awoodoodu tahay biyo iyo saabuun.

# TIMA JARIDDA MAXAABIISTA

1. Maxbuus kasta oo xukuman Xarigiisuna ka badan yahay bil waa in timaha loo jaraa ama laga xiiraa iyadoo la tixgalinaayo Caafimaadkiisa hadii uu leeyahay gar ama shaaribo waa in laga daadiyaa.
2. Haweenka xiran waa in an timaha laga jarin hadii aanu sarkaalka caafimaad ee Xabsigu Caafimad iyo naadaafad ahaan daraadeed talo ku dhibin ln laga jaro ama laga xiiro.
3. Maxaabiista garsugayaasha ah iyo Rafcaanalayaasha timahooda waxaa loo daynayaa sidii ay ahaayeen markii ay soogaleen Xabsiga, haddii aynan jirin sabab kale oo kalifaysa in la jaro ama la xiiro.
4. Hadii ayna wax u dhimin nadaafadda iyo caafimaadka Guud timo lahaanshaha Maxbuuska, maxbuus kasta bisha u dambeysa Xarigiisa waa in aan laga xiirin timaha hadii uu sidaasi rabo mooyee waxaa ka reeban wax alaale wixii ku dhisan Aas'aas diini ah ee la xiriira timo jaridda Gar iyo Shaarib xiiridda qofka.

# JIMICSI

Maxaabiista oo dhan kuwo caafimaad xumida darteed Sarkaalka Caafimaadka uga reebay iyo kuwa takooran ma ahayn, waa in ay helaan jimicsi joogta ah sida uu dhigaayo amarka joogtada ah ama sida uu kolba uu ku taliyo taliyaha Xabsiga. Maxaamiista kale ee ku jira edegyada gaark ah waa in lagu siiyaa banaanka edega hortiisa ama qolka shaqada, jimicsi aan ka badneyn hal saac maalintii haddii aan sarkaalka caafimaadka Xabsiga si kale ku talin.

- Maxaabiista Xabsiga dheer oo dhan ee ku xiran Xabsiyada Dhexe ama kuwa gaarka ah waa in bishiiba mar loo miisaamaa koox-koox, Galbaha Khamiista ama maalmaha jimcaha ah , Maxbus kasta waa in miisaankiisa lagu qoraa galkiisa

# DHAMMEYSTIR

- Taliyaha xabsigu waa inuu hor dhigaa sarkaalka caafimaadka maxaabiista miisaankoodu uu aad hoos ugu dhacay si loo baaro sababta keentay hoos u dhaca, kadibna wax loogu qabto.

- MAMNUUCIDDA KHAMRADA IYO WAXYAABAHA KALE EE MASKAXDA DOORIYA.

Soo gelitaanka xabsiga waxaa ka reeban oo aan la ogoleyn waxyaabaha hoos ku taxan.

a. Wax alaale wixii cabitaan ah ee Alcohol-o ku jirto.
b. Xashiish.
c. Afiyuum-ka.
d. Heroyiinka.
e. Kokayiinka
f. Binjiga.
g. Qaadka, iyo wax alaale wixii kale ee doorin kara xiska qofka

# SHAQADA MAXAABIISTA

a) Maxaabiista xukuman oo ay ku jiraan maxkaabiista la haaye yaasha oo hayntooda lasoo xalaaleeyey waa in ay ka shaqeeyaan meeshii loo diro una shaqeeyaan sida uu amarka ku dhiibo taliyaha xabsiga.

b) Waxa ay ka shaqeynayaan meeshii suurtogal ah in shaqada maxaabiistu ku dhisanto wadajir ahaan iyo bulsho ahaan, waxayna ka faa'ideysanayaan wax barasho iyo tacab kordhin.

c) Hadii taliyaha xabsiga uu ogaado inuu jiro maxbuus ka mid ah maxaabiista kale dhexdooda inuu shaqadaasi qabto ay tahay mid halis ku ah nabad gelyada, wuxuu amrayaa in maxbuuskaasi si gaar ah loogu shaqeeyo.

d) Taliyaha xabsiga asagoo tixgelinaayo sarkaalka caafimaadka ee xabsiga wuxuu awood u leeyahy in uu amro maxbuus ka mid ah maxaabiista inuu si gooni ah u shaqeeyo meel ka baxsan maxaabiista kale.

e) Ku shaqeynta maxaabiista ama tababar siinta wxa ay bilaabaneysaa markii go'aanka xukunka maxkamadii ugu horeysay ku dhawaaqdo, maxaabiista la haayeyaasha ahna waxa ay ku shaqeyntoodu dhaqan galaysaa markii hay'adahii sharci ahaan awoodda u lahaa soo xalaaleyso hayntiisa.

# MAXAABIISTA AAN SHAQEYN KARIN

- Hadii la arko iney jirto maxbuus xukuman ama mid la haaye ah in aanu shaqeyn karin shaqada caadiga ah xagaga caafimaadka, da'da ama iin kale aawgeed waxaa loo dhiibayaa shaqooyinka fud fudud sida:- Beer faloow, Nadiifinta ama shaqo kale oo fudud, waana hadba sida ay taliyaha xabsiga ula noqoto.
- Xabsi kasta waa in shaqada maxaabiista maalin kasta loo qoraa loona habeeyaa sida hadba taliyuhu amarka ku bixiyo, saacadaha shaqaduna waxay ahaanayaan sida lagu tilmaamo hadba amarada joogtada ah inta laga soo saarayo, waxayna ahaanayaan sida uu taliyuhu amarka ku bixiyo.
- CAYMIN_____

# CAYMIN

1. Taliyaha xabsiga waxaa ku waajib ah inuu ka hor tago wax alaale wixii halis gelin kara daryeelka iyo caafimaadka maxaabiista shaqeyso.
2. Hadii ay dhacdo in hawsha qabashadeeda uu maxbuus kasoo gaaro dhaawac sababna ayna u ahayn dadaal darradiisa iyo feejignaan la'aantiisa taliyaha xabsiga wuxuu awood u leeyahay inuu amro in la siiyo samirsiin.
3. Hadiise maxbuuska ku dhaawacmo shaqda xabsiga ayna sabab u tahay dadaal darro ama hawl gabid ka timid xubin ciidanka ka mid ah markii laga baaraan dego dacwadiisa lana ogaado sababaha keenay dhaawacaasi ciidanku waa inuu bixiyaa wixii mag dhaw ah oo u dhigmo dhaawaca gaaray maxbuuska, kadibna ciidanku uu weydiisto wasaaradda maaliyadda iyadoo la waafajinaayo shuruucda dalka u degsan.

# CAAFIMAADKA MAXAABIISTA

- Waajibaadka guud iyo xilka sarkaalka caafimaadka waa sidan:-

1. Sarkaalka caafimaadka ah ee ku xusan xeerkani waa inuu:

a. Maxbuus kasta uu u baaraa si is daba joog ah.

b. Baaraa maalin kasta maxbuus kasta oo dil loo haysto, kan dilka lagu xukumay, ama midka takooran.

c. Koormeeraa maxaabiista shaqeyneysa waqti ka waqti.

d. Wargeliyaa taliyaha xabsiga markuu arko maxbuus aad u buka oo u baahan wax ka qabasho dhaafsiisan awoodiisa.

e. Ugu yaraan bishii mar uu koor meeraa xabsiga oo dhan isagoo fiiro gaar ah siinaayo alaabta wax lagu kariyo iyo qalabka caafimaadka xabsiga.

# DHAMMEYSTIR

2. Sarkaakla caafimaadku waa inuu baaraa maxaabiista waqtiyadaan soo socda:

a. Soo gelitaanka maxbuuska, markii maxbuuska loo badelo xabsi kale.

b. Bixitaanka maxbuuska.

3. Hadii maxbuus xarigiisu dhammaaday markuu baxaayo lagu arko ama uu qabo cudur joogto ah ama mid faafa waxaa la hor geynayaa sarkaalka caafimaadka waxaana lagula dhaqmayaa hadba talada uu ka dhiibo sarkaalka caafimaadka.

4. Hadii la arko maxbuus qaba cudur faafa ama lakala qaado sarkaalka caafimaadku waa in uu isla markaaba talaabooyinka ku haboon ka qaadaa uguna hor tagaa si aan cudurkaasi ugu faafin xabsiga iyo maxaabiista.

# DHAMMEYSTIR

5. Sarkaalka caafimaadka hadii uu ku ogaado koormeerkiisa iyo baaristiisa in loo baahan yahay in wax laga badelo xagga shaqada, cuntada, dharka, Jiifka ama alaabta la xiriirta maxbuus ama koox maxaabiis ah wuxuu awood u leeyahay inuu usoo bandhigo taliyaha xabsiga ra'yigiisa oo qoraal ah

# BUUGAAGTA UU MAAMULAAYO SARKAALKA CAAFIMAADKA

- Sarkaalka caafimaadku waa inuu maamulaa buugaagta iyo galalka hoos ku xusan:

a. Buuga muujinaaya Magaca cudurka iyo Daawada maxbuus kasta oo buka.

b. Buug si buuxda u muujinaaya maxbuus alaale maxbuuskii ku dhinta xabsiga oo aan ahayn kuwa xukunka dilka ah lagu fuliyey oo cadeynaya:-

- Dib u raaca caafimaadkiisa
- Sababta dhimashada
- Daaweynta
- Xog waran ku saabsan muuqiisa dhimashadii kadib( marka la sameeyo dhimasho kadib baaris) oo ay wehliyaan wixii tilmaamo gaar ah ee ay la noqotoin loo baahan yahay.

# DHAMMEYSTIR

- Diiwaan uu ku qoro faalooyinka iyo talooyinka uu hadba ka bixiyo xabsiga iyo maxaabiista.

## TALAALKA IYO DURISTA MAXAABIISKA

1. Hadii ay la noqto sarkaalka caafimaadka lagama maarmaan maxaabiista caafimaadkooda ama xubnaa ciidanka ah ee xabsiga ka shaqeeya ama kan dad weynaha aawgii wuxuu awood u leeyahay inuu fuliyo duridda maxaabiista talaalka ama xubnaha ciidanka.
2. Maxbuuska diida in la talaalo ama la duro waxaa loo qaadanayaa inuu galay gef ka mid ah gefefka yar yar ee xabsiga sida ku xusan Qod. 47aad xarafkiisa 1aad ee xeerka xabsiyada

# BOOQASHOOYINKA QAREENNADA

1. Taliyaha xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu u ogolaado maxbuuska aragtida qareenkiisa isagoo markastaba raacaya sharciyada dalka wixii la xiriira dacwadiisa ama rafcaan qaadashadiisa.

2. Taliyaha xabsigu waa inuu u fududeeyaa qareenka maxbuuska soo booqanaayo tawaawushihii aragtida uuna siyaa waqti si uu ugala xaajoodo maxbuuska wixii arimo ah ee la xiriira dacwadiisa.

3. Maxbuuku waxa uu ka arki karaa qareenkiisa hawlo kaleoo uu u baahan yahay in sharci ahaan wax looga qabto, aragtidaasu waxa ay ku xiran tahay Ogolaanshaha maxkamadda sare ama xeer ilaalinta uu u xiran yahay sida ku cad Qod. 60aad ee Xeer Nidaamiyaha Xabsiyada.

# KALA SAARIDDA MAXAABIISTA

- Si loo sugu kala saaridda maxaabiista xukuman iyo kuwa aan xukunneyn loona fuliyo awaamiirta ku dhigan Qodobka 23aad ee xeerkan.
- Markii maxbuus gar suge ah ama la haaye ah xukun ku dhaco waa in maxkamadda ama hay'adda xukuntay ama go'aanka gaartay soo raacisaa Jideeyaha xukunka oo laga badelaayo shuruudaha ku xusan Qod. 41aad ee XHCS.
- Maqnaanshaha ama dib u dhaca jideeyuhu wuxuu maxbuuska muteysiinayaa inuu baaqi ku ahaado gar suge nimada.

# SII DEYNTA MAXBUUS MAXKAMADDA HORTEED AH

- Markii maxkamad ama hay'ad kale oo sharci ahaan awood u leh ay go'aan ka gaarto in maxbuus lagu sii daayo horteeda kaasi oo ahaa xukunsane ama gar suge ama la haaye, maxkamadii ama hay'adii sii deysay waa in ay isla markiiba gaarsiisaa go'aanka xabsiga maxbuuskaasi hayntiisa mas'uulka ka ahaa si' tabaabushaha la xiriira sii deynta loo fuliyo sida ugu dhaqsiyaha badan.
  - SOO HORJOOJINTA MAXBUUS MAXKAMADDA HORTEED

Sida ku xusan Qod. 18aad ee xeerkan markii maxkamaddu amarto in la hor keeno maxbuus waxay toos ugu direysaa amar qoraal ah taliyaha xabsiga maxbuuskaasi uu ku jiro, waxaana amarkaasi saxiixaaya gudoomiyaha maxkamadda ama garsoore ka tirsan maxkamadda amarka bixisay, hadii qofka kaxeeynaayo maxbuuska aanu ahayn xubin ka tirsan ciidanka gacanta ku haaya maxbuuska waa in la xaqiijiyaa shuruudaha hoos ku xusan kadibna laga saxiixaa qofkii kaxeeynaayey xil qaadka maxbuuska:-

# DHAMMEYSTIR

a) Xaashida aqoonsiga ciidanka uu ka tirsan yahay
b) Magaciisa oo saddexan
c) Lambarkiisa, tilmaamahaasi kor ku xusan waxaa lagu qorayaa diiwaanka iridda xabsiga

- **WARGELINTA MAXBUUS AMAR MAXKAMADEED**

Markii maxbuus la war geliyo amar maxkamadeed ee la xiriira dacwadiisa ama mid uu marag ka yahay ama mid madani ah waxaa maxkamaddu ay toos ugu direysaa qaabkii wargelinta taliyaha xabsiga maxbuuska lagu haayo isaguna waa in uu isla markiiba gaarsiyaa maxbuuska war gelintaasi kana saxiixo kadibna u celiyo nuqulkii oo saxiixan maxkamadii soo dirtay

# MUDADA IYO XABSI DHIMIDDA XUKUNKA

1. Mudada xukunka xariga maxbuus waxa ay ka bilaabanaysaa loogana tirinayaa maalintii qabashada sida ku dhigan Qod. 47aad XHCS.
2. mudada xukunka xariga ee maxbuuska oo ku ca sanado, Bilo iyo maalmo waxaa la raacayaa bilaha iyo sanadaha Calanderka.
3. Maxbuuska waa in la hayaa tan iyo maalinta ugu dambeysa ee mudada uu ku xukuman yahay.
4. Mar kasta oo xukun dil ah loo badelo xarig mudada xukunku waxa ay ka bilaabanaysaa maalinta qabashada.
5. Mar kasta oo xukun dil ah laga dhigo xabsi daa'in ama xukun sanad ah mudada xukunku waxa ay ka bilaabaneysaa xabsi dhimid aawgeed taariikhda maxbuuka la qabtay.
6. Marka maxbuus lagu xukumo ganaax iyo xarig ama ganaax gadid xarig wuxuu xabsi dhimid ku yeelanayaa qeybta xukunka ganaaxa ama mudada uu xabsiga ugu jiro bixin la'aanta ganaaxaasi..
7. Maxbuuska xukumana ee waasha loona badelo taqtarka maskaxda markii la xaqiijiyey waalidiisa wuxuu xaq u yaalanayaa xabsi dhimid xarig mudada uu dhaqtarka ku jiro, waxaana shardi ah in aadaabtiisa iyo shaqadiisaba[illegible]yeen kuwa fiican mudadii ka horeysay waalida.

# HABKA XABSI DHIMIDDA LOO MAAMULAAYO

- Maxbuus kasta oo xukumani wuxuu yeelanayaa gal lagu muujinaayo mudada xukunka xabsi dhimidda xariga ee uu yeelan karo iyo xabsi dhimidda laga qaaday haday dhacdo waxaa kaloo galkaasi lagu muujinayaa mudada bixitaanka ugu soo horeysay iyo mudada ugu dambeysa sii deyntiiisa kuwaasii kala ah tan hore hadii uu muteystay xabsi dhimid, tan dambana ay tahay markii aanu muteysan xabsi dhimid.

## SII DEYNTA CAADIGA AH EE MAXAABIISTA

1. Marka uu dhammeysto mudadii xariga loona tix geliyo xabsi dhimid.
2. Markay sii deyso maxkamadda rafcaanka oo burisay xukunkii maxkamadda hoose.
3. Cafis guud ama mid gaar ahaaneed oo lagu soo saaray si sharciga waafaqsan.

# RAFCAANLEYAASHA

- Maxaabiista rafcaanleyda ah mudada uu sugaayo go'aanka rafcaanka waxaa lagu haaynayaa meel ka gaar ah maxaabiista kale ee xukuman, hadiise aan xabsiga uu ku jiraa u habeysneyn ama ay la noqto taliyaha xabsiga in aanay suuragal ahayn waxay ka mid ahaanayaan maxaabiista xukuman.
- Marka maxbuuska rafcaanlaha ah uu hor tago maxkamadda wuxuu labisanayaa hugiisii caadiga ahaa, hadiise hugiisa aanu ahayn mid u qalma qofnimda taliyaha xabsiga wuxuu siinayaa Hu' ka duwan kan maxaabiista
- Maxaabiista gar sugeyaasha ah iyo la haayeyaasha dhawraya go'aanka xalaaleynta hayntooda isku meel ayaa lagu hayn karaa hadii aanu taliyaha amar kale ku bixinin, waxaa ka baxasan maxaabiista xukuman oo ayagu hayntoodu ay tahay meel gooni ah.

# MAXBUUSKA KU EEDEYSAN DILKA

1. Maxbuuska ku eedeysan dil hadii ay suuragal tahay waxaa lagu haaynayaa mel gaar ka ah, waxaana la siinayaa feejignaan buuxda, hase ahaatee dhaqankiisa kale sida cuntada, gogosha iyo dharkaba wuxuu la mid ahaanayaa gar sugeyaasha.
2. maxbuuska ku eedeysan dil marnaba looma diri karo shaqo.

- Mararka qaarkood hadii loo baahdo danta guud ee qaranka aawgeed maxbuus gar suge ah ama la haye ah ee dhowraya go'aankii xalaaleynta hayntiisa wa lagu shaqeyn karaa, marka ay shaqeeyaan maxaabiista noocaasi ah waxa ay yeelanayaan wax alaale wixii abaal gud ah ee uu siinaayo xeerka iyo xeer nidaamiyaha maxaabiista xukuman

# MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN

1. Maxbuu kasta oo dil ku xukuman waxaa lagu haaynayaa edega daryeelka buuxa, waxaana ilaalin joogto ah ku haaynaya ciidan ku filan habeen iyo maalinba.
2. Maxbuus kasta oo dil ku xukuman fulitaankii dilkiisuna soo dhammaaday waxaa si joogto ah u ilaalinaaya xubno ciidanka ka tirsan oo aan tiradoodu ka yareyn saddex Qof ugu yaraana midkood uu yahay sarkaal xigeen.
3. Taliyaha xabsiga waxaa si gaar ah loogu xil saarayaa inuu hubiyo daryeelka nabad gelyada maxbuuska noocaasi ah.

# DARDAARAN

- Fulitaanka dilka ka hor wuxuu taliyaha xabsiga weydiisanayaa maxbuuska inuu doonayo inuu dar daarmo haduu maxbuusku doono inuu dardaarmo waxaa laga qorayaa dar daaran kaasi isagoo uu goob joog ka yahay garsoore maxkamadeed iyo qareenkiisa, waxaana loo gudbinayaa qofka uu quseeyo dar daaran kaasi, hadii uu ku jiro dar daaran kaasi wax aan sharcigu ogoleyn taliyaha xabsigu wuxuu awood u leeyahay inuu ka reebo.